

# Su'aalaha Socdaalka

## Su'aasha + jawaabaha

Magaallada Brooklyn Park waxay aqoonsan tahay marxaladaha balaaran ee muwaadinimada ee ka jira magaalada, ayna ku jiraan shaqsiyaadka halkaan sharciyada ku jooga ee haysta kaararka daganaanshaha, fiisooyinka ardayda iyo shaqada, iyo sidoo kale dadka aan wax dukumiinti ah haysan. Sharaf ayay noo tahay inaan taageerno aana u adeegno dhammaan dadka magaalada dagan ayadoo aan loo eegayn xaaladooda muwaadinimo.

### Magaallada Brooklyn Park ma magaallo soo galootiga difaacdaa?

Maya hadda; Erayga "Magaallo Soo galootiga difaacda" waxaa badanaa laga wadaa magaalooyinka si buuxda u diida ama haddii kale yareeya wada shaqeynta ay la sameeyaan wakaaladaha federaalka ee fuliya sharciyada socdaalka. Noqoshada Magaallo Soo Galootiga difaacda ayaa caadiyan u baahan talaabo ay qaadaan hogaanka magaalada, sida Golaha Deegaanka ee Magaalada Brooklyn Park.

### BPPD ma ka qaybgashaa weerarada looga soo qabanaayo dadka bilaa sharciga ah guryahooda, dugsiyada, goobta shaqada, ama goobaha kale ee dadwaynaha si loo xiro?

Maya; BPPD ayaan kala qaybgelin ICE ama wakaaladaha kale ee federaalka soo qabqabshada dadka magaalada dagan ee bilaa sharciga ah. Hase yeeshee, wakaaladaha federaalka ayaa si madax banaan u qabsan kara shaqooyinkaan gudaha Magaalada. Waxaa intaas dheer, wakaaladaha federaalka ayaan markasta u sheegi karin BPPD shaqooyinkooda ama qorshooyinkooda. Ugu danbayntii, BPPD ayaan ishortaagi karin saraakiisha federaalka inta ay gudanayaan waajibbaadkooda, xataa haddii Magaalada Brooklyn Park ay yeelato aqoonsiga magaalada difaacda soo galootiga.

### Haddii qof yaqaano shaqsi sharci daro ku jooga magaalada kadibna uu waco BPPD, ma soo xirayaan qofka oo ma wacayaan ICE ama wakaaladaha kale ee federaalka?

Maya; BPPD waxay keliya soo faro gelinaysaa dhacdooyinka daran oo keeni kara xirista ama xabsi dhigista qofka. Inta badan, in uusan qofku haysan sharci waa arin madani ah mana ahan arin danbi ah.

### Haddii Waaxda Booliiska ee Brooklyn Park (BPPD) ay ogtahay in qof uu yahay sharci daro, xogtaan ma la wadaagaan ICE ama wakaaladaha kale ee federaalka?

Maya; BPPD si iskeed ah xogta muwaadinimada ulama wadaagto ICE iyo wakaaladaha kale ee federaalka.

Hase yeeshee, haddii qofka la xiro loona mudeeyo xabsi dhigis, waxaa jira farsamooyin ka dhex jira nidaamka cadaalada danbiyada (sida faro qaadista), kuwaasoo si otomaatig ah ugu sheegaaya ICE ama wakaaladaha kale ee federaalka xaalada soo galootinimo ee qofka. Waxaa intaas dheer, ICE iyo wakaaladaha kale ee federaalka ayaa dadka sharci darada ah kala bixi kara saldhiga booliiska oo gayn kara saldhigyada ICE (marka ay soo qaataan damaanad uu saxiixay garsoore).

### Haddii ICE ama wakaaladaha kale ee federaalka ay aqoonsadaan qof bilaa sharci ah oo magaalada jooga, BPPD ma qabanaysaa oo ma soo xiraysaa qofkaas ilaa ciidanka federaalku imaanayaan?

Tsis yog; BPPD yuav tsis pab ntes tib neeg ntaawm ICE los yog Federal Agencies. Tabsi, yog hais tias tug xam ua txiav txim txib kom BPPD ua, ces BPPD yuav tsum ua raws li lo lus txib raws cai ntaawv.

**Tusaalaha jebinta sharciga madaniga ah:** Qof joogay muddo ka badan intii fiisadiisa ku qornayd, ama ku fashilmay inuu joogteeyo aqoonsigiisa Daganaanshaha Rasmiga ah ee cusub.

### Tusaalaha jebinta sharciga danbiyada:

Qof aan sharci ku joogin, lagu tarxiilay hanaanka ICE, kadibna dib ugu soo laabtay dalka kadib markii la tarxiilay..



### Sidee ayaan ku helayaan khayraadka soo galootiga gudaha Brooklyn Park?

Magaalladu si caadi ah uma bixiso caawimaada socdaalka. Waxaan ku boorinaynaa dadka magaalada dagan ee bilaa sharciga ah inay akhriyaan **nidaamkeena Khayraadka Bulshada.**





# Su'aalaha Inta Badan la Iska Waydiiyo (FAQ) Socdaalka

## Kheyraadka Bulshada



### Agabka Kheyraadka Bulshada Brooklyn Park

Magaaladu si rasmi ah uma bixiso kaalmo socdaal. Waxaan ku dhiirigelineynaa dadka aan sharciga lahayn inay tixraacaan **Agabka Kheyraadka Bulshada** si aad u hesho liistada ururada aan faa'iido doonka ahayn ee ka caawiya dadka qeybtan.



### Mid-Minnesota Legal Aid

Mid Minnesota Legal Aid waxay bixisaa caawimaad sharci oo madani ah oo lacag

la'aan ah ee dadka saboolka ah iyo dadka da'doodu tahay 60 sano ama ka weyn ama kuwa naafada ah.

[www.mylegalaid.org](http://www.mylegalaid.org)

1-877-696-6529



### Immigrant Law Center of Minnesota (ILCM)

The Immigrant Law Center of Minnesota (ILCM) waa urur aan macaash doon ahayn oo siiya matalaad sharci oo lacag la'aan ah soo galootiga iyo qaxootiga dakhligoodu hooseeyo ee Minnesota iyo North Dakota.

[www.ilcm.org](http://www.ilcm.org) | 1-800-223-1368



### The Advocates for Human Rights

Hadafka The Advocates for Human Rights waa in la hirgaliyo heerarka caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha si loo hormariyo bulshada rayidka ah loona xoojiyo xukunka sharciga.

[www.theadvocatesforhumanrights.org](http://www.theadvocatesforhumanrights.org)

[hrights@advrights.org](mailto:hrights@advrights.org) | 612-341-9845



### Delegation of Parental Authority (DOPA)

A Delegation of Parental Authority (DOPA) waa dhukumiinti u ogolaanaya qof inuu daryeelo caruurtaada marka aadan awoodin, sida masaafurinta ama la xiro.

[www.lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/delegation-parental-authority-dopa](http://www.lawhelpmn.org/self-help-library/fact-sheet/delegation-parental-authority-dopa)

*If you need this information in another language or format or disability accommodations, email [access@brooklynpark.org](mailto:access@brooklynpark.org) or call 763-424-8000.*

*Si usted necesita esta información en español: 763-424-8000*

*Yog xav tau kev pab, thov hu rau 763-424-8000 lawv mam li nrhiav ib tus neeg txhais lus rau koj*